

Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:
<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Maarso 25, 2021

Ku socota: Dhammaan Shaqaalaha ODDS, Daneeyayaasha iyo Daryeel bixiyayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: U rajeynaya Bruce Baker wanaag badan

Iyada oo jiraan dareeno isku dhafan, waxaan ku dhawaaqayaa in Maamulaha Adeegyada Caruurta ee ODDS Bruce Baker uu shaqada ka fariisanayo dhammaadka Maajo.

Bruce wuxuu shaqadiisa u hibeeyay taageerida carruurta iyo qoysaska. Ka hor intuuusan imaan ODHS wuxuu u soo shaqeeyay hay'ad aan faa'iido doonka ahayn, oo inta badan ah qaybta caafimaadka maskaxda ee carruurta. 11 sanadood ee u dambeeyay wuxuu u huray adeegyada carruurta ee ODDS.

Bruce wuxuu sheegay “waxaan dareemayaa nasiib in aan caga dhigtay booskani shaqo oo ay igu hareeraysnaadaan qoysas iyo xirfadleyaal xambaarsan aragtidani si carruurta iyo qoysaska looga caawiyo in ay yeeshaan nolol buuxda.”

Hoggaamintiisa joogtada ee adeegyada carruurta iyo rabitaankiisa ah in uu ka shaqeeyo barnaamijyada oo dhan si loo buuxiyo baahiyaha carruurta iyo qoysasku, waa xirfad u faa'iideysay dad badan.

Bruce wuxuu kor kala socday ballaarinta adeegyada carruurta ee hoos yimaada K Plan kaasi oo u suurtageliyay qoysaska in ay taageeraan carruurta qabta baahiyaha muhiimka ah iyaga oo joogo guryaha qoyskooda. Wuxuu ballaariyay helitaanka adeegyada guryaha la degan

yahay ee carruurta oo gaarsiiyay magaalooyinka waaweyn, si marka qoysasku u baahdaan in ay doortaan adeegyada guryaha la degan yahay oo loogu talagalay carruurtooda markaasi adeegyadaasi lagu bixin karo meel u dhow guriga. Wuxuu kordhiyay wada shaqeynta guud ahaan adeegyada, oo ay ku jiraan la shaqeynta daryeelka carruurta iyo caafimaadka hab-dhaqanka ee carruurta.

Wuxuu sameeyay saameyn la yaab leh, oo wanaagsan waanan u xiisi doonaa isaga.

Waqtiyadan sidan oo kale ah waa muhiim in la eego fursadaha si loo wanaajiyo waxa aan qabano. Waxaanu u isticmaaleynaa isbeddelkani si aanu wax uga beddelno oo loo xaqiijiyo in carruurta iyo qoysasku si xoog leh diiradda u saaraan dhammaan dadaaladayada siyaasadeed. Shaqaalaha siyaasada iyo tababarka ee ka tirsan kooxda adeegyada carruurta ayaa noqon doona qayb ka mid ah siyaasada kooxda ODDS oo ka amar qaata Agaamisa Ku-xigeenka ODDS ee Anna Lansky. Waxaanu si dhaksho ah u shaqaaleysiin doonaa Maamulaha Adeegyada Carruurta oo cusub. Booskani ayaa sii hayn doona kormeerka barnaamijka Guryaha a degan yahay ee Carruurta, barnaamijka Adeegyada Carruurta ee Guriga Dhexdiisa ee Ballaaran (CIIS) iyo qorsheynta dadaalada ka qayb qaadashada adeegyada carruurta. Fadlan fiirso soo dhajintaasi haddii aad xiiseynayso.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Fariintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.